Hennepin County

Housing and Redevelopment Authority

Hennepin County Lacagaha Lagu Taageero Ganacsiyada Yaryar
Tilmaamaha, Su'aalaha Badanaa La Isweydiiyo, Warqadda Hubinta Codsiga

Macluumaad barnaamijka ayaa sidoo kale lagu heli karaa Af Isbaanish, Af Somali, Af Hmong, Af Fitnamiis: bit.ly/HCBRF.

Dib loo eegay Maarso 23, 2026

Ganacsiyo yar yar oo badan oo ku yaal Degmada Hennepin, oo ay ku jiraan ganacsiyada ay leeyihiin dadka soogalootiga ah iyo kuwa ku yaal goobaha dhaqanka iyo ganacsigu ay aadka u mashquul badan yihiin, ayaa wajahay dhibaatooyin dhaqaale iyo shaqo oo daran iyadoona ay sabab u tahay tallaabooyinka sharci fulinta socdaalka federaalka ee dhawayd. Maamula Guryaha iyo Dib-u-dhiska Hennepin County (HCHRA) ayaa ka dhigaysaa in la heli karo qiyaastii $2 milyan oo ah deeqo u dhexeeya $3,000 iyo $10,000 si loogu caawiyo ganacsiyada ay soo gaartay saameynta si ay uga soo kabtaan dhibaatooyinkan dhaqaale ee muddada gaaban ah iyadoona u saaminxi doonto inay ka sii wadaan ganancsiga bulshadooda dhaxdooda iyo in laga hortago inay dhibaato baahsan ka dhax dhacdo Hennepin County.

Si ay ugu qalmaan, ganacsiyadu waa inay ku leeyihiin dukaan ama xafiis Hennepin County. Ganacsigu waa inuu wajahaya dhibaatooyin dhaqaale iyo mid shaqo oo daran taasoona ay sabab u tahay "Hawlgalkii Laga waday aagga Metro," oo ah ficilka askarta sharci fulinta federaalka ee bilaabmay Diseembar 1, 2025. Ganacsiyada waa inay soo gudbiyaan codsi waana inay buuxiyaan dhammaan shuruudaha u-qalmitaanka ee lagu sharraxay Tilmaamaha Lacagaha la siino Ganacsiyadac.

Ganacsiyada yaryar ee u qalma waxay heli karaan deeqo hal mar la siiyo oo dhan $10,000 si ay uga gacan uga siiso inay iskaga bixiyaan kirada ganacsiga ama lacagaha deynta guryaha ganacsiga muddo laba bilood ah iyagoo la macaamilaya macaamiil yar, xidhitaan ku meel gaar ah, carqaladeyn shaqaale, iyo dhibaatooyin kale oo ay keento Sarkaalada lagu soo daadiyay magaalada.

HCHRA waxay la shaqeyneysaa NextStage, oo ah koox aan macaash doon ahayn oo bixisa talo ganacsi iyo amaaho yaryar, si ay u maareyso deeqahan.

Hennepin County waxay xaq u leedahay inay dib ugu eegto go'aankeeda gaarka u ah tilmaamahan wakhti kasta.

Taariikhaha muhiimka ah

Tilmaaha ayaa la soo dhigay	Khamiis, Maarso 12, 2026 markay tahay 4:00 p.m.
Codsiga ayaa furmaya	Arbaco, Maarso 18, 2026 markay tahay 4:00 p.m.
Codsiga ayaa xirmaya	Arbaco, Maarso 25, 2026 markay tahay 4:00 p.m.

Codsiyada waxaa la soo gudbin karaa wakhti kasta inta lagu jiro muddada codsi-soo gudbinta.

Isticmaalka lacagaha deeqda

Lacagta deeqda waxaa loo isticmaali karaa in hal mar lagu bixiyo lacagta kirada ganacsiga ama deynta muddo dhan laba bilood si looga caawiyo ka hortagga dhibaatooyinka dhaqaale ee ay keeneen Sarkaalada lagu soo daadiyay Magaalada. HCHRA waxay sidoo kale dooran kartaa hawla kale oo hal mar loogu isticmaalo lacagta. Dhammaan isticmaalka waa inay si cad uga yimaadaan goob ku taal Hennepin County.

Ganacsiyada u qalma

Si loogu qalmo, ganacsigu waa inuu

- Ganacsiyada leh in ka badan hal goob oo ay dadka so booqan karaan waxay goob kasta u soo gudbin karaan hal codsi. Si kastaba ha ahaatee, mulkiilaha ganacsi kasta, ama ganacsi kasta oo si gaar ah loo leeyahay wuxuu ka heli karaa lacag aan ka badnayn wadarta $24,999 Lacagaha
- Awood u leeyahay inuu cadeeyo inuu galay khasaare weyn oo dakhli ah kana dhashay Hawlgalkii lagu soo qaaday Magaalada inta lagu jiro muddada u dhaxaysa Diseembar 1, 2025 ilaa iyo Febraayo 28, 2026 (khasaaraha weyn waa in lagu qeexo hoos u dhac dhakhli oo dhan 30% ama muddo la barbar dhigi karo).
- Yahay mid shaqaynaya oo raacaya qawaaniinta Xoghayaha Gobolka Minnesota.
- Mid shati haysta (haddii loo baahdo), uu raaco shuruudaha iyo inuu waqtigiisa ku bixiyo dhammaan canshuuraha hantida iyo deymaha kale (marka laga reebo Kitada iyo deynta).

- Ka iibiyaa alaab iyo/ama uu si toos ah u siiyaa macaamiisha adeegyo shaqsi ahaan, waxayna ku xiran tahay dadka booqanaya (tusaalooyinka waxaa ka mid ah makhaayadaha, dukaamada tafaariiqleyda, goobaha la isku qurxiyo, ganacsiyada daryeelka shaqsiyeed) goobta uu ku yaalo dukaanka. Ganacsiyada kaliya ah onlaynka ah ama kuwa lagu shaqeeyo xaafada uma qalmaan.
- Mid ay u shaqeeyaan wax ka yar 50 shaqaale oo waqti buuxa shaqeeya una dhigma shaqaalaha (FTE) laga bilaabo 12/31/2025. Deeqaha la siiyo ganacsiyada aan lahayn shaqaale marka laga reebo milkiilaha laga bilaabo 12/31/2025, waxaa lagu xaddiday ugu badnaan $3,000.
- Qabanayay hawlo dakhli lagu soo uruurinayo ugu saddex (3) bilood kahor 12/1/2025, iyadoo dakhligeeda sanadlaha uu yahay ugu yaraan $25,000 iyo inuusan ka badnayn $4 milyan.

Ganacsiyada aan u qalmin

- Ganacsiyada guriga lagu sameeyo; kuwaas oo aan lahayn goob ganacsi oo ay ayaga leeyihiin.
- Ururada aan macaash doonka ahayn.
- Shirkadaha waaweyn, shirkadaha leh goobo ku yaal gobollo badan, iyo ganacsiyada isticmaala magac shirkad weyn (haddii aysan jirin caddayn sheegaysa inuu leeyahay qof deegaanka ah).
- Ganacsiyada ku jira dhismayaasha ay ku nool yihiin dad badan oo kireystayaal ah oo leh in ka badan 250,000 fiid oo laba jibbaaran oo ah goob ganacsi (aan ahayn guryo)
- Ganacsiyada inta badan dakhli ka hela
    - waxyaabaha ay ka iibiyaan ganacsato kale, qandaraasyada dowladda, ama qandaraasyada/xubinnimada mararka badan la bixiyo
    - maalgashiyada uusan qofka asaga ka shaqaynin; iibsashada ama iibinta hantida ma-guurtada ah; kireysiga ama maaraynta guryaha; boodhadhka xayeysiinta
    - ololayn.

Shuruudaha deeqda

- Deeqda hal mar la bixiyo waxay u dhigantaa lacagta laba (2) bilood oo kira ah (ama lacagaha deynta oo laba bilood ah) ugu badnaana dhan $10,000. Deeqaha la siiyo ganacsiyada aan lahayn shaqaale marka laga reebo milkiilaha laga bilaabo 12/31/2025, waxaa lagu xaddiday ugu badnaan $3,000. Lacagta waxaa loo isticmaali doonaa in si toos ah loogu bixiyo lacagta kirada, ama in lagu magdhawo lacagahii kirada ee horey loo bixiyay. Lacagta deeqda looma isticmaali karo kharashyada horey loo daboolay, ama la filayo in lagu

daboolo, deeqaha kale. Xaalado gaar ah, Hennepin County waxay xaq u leedahay inay ansixiso kharashaadka kale ee hawlgalka.

- Lacagta waxaa loo bixin doonaa sidii deeq mana loo baahan doono in dib loo soo celiyo.
- Deeqaha waxaa laga yaabaa in lagu soo rogo canshuuraha federaalka iyo/ama gobaalka ama mida deegaanka. Ganacsiyada waxaa lagula talinayaa inay la tashadaan la-taliye canshuur oo xirfad leh. Ganacsiyada hela lacagaha deeqda ah waxay ka heli doonaan NextStage dukumentiga 1099G, iyagoo matalaya HCHRA.
- Codsadayaashu waa inay filayaan in dadka maamula deeqda ay soo booqan karaan si loo xaqiijiyo in ganacsigu u-qalmo.
- Codsadayaasha waxaa laga rabaa inay galaan heshiis deeq waxaana laga rabaa inay hayaan dukumentiyada kharashyada u-qalma ee ay galaan muddo lix sano ah.

Hanaanka Codsiga

Dhammaan codsiyada la helo inta lagu jiro muddada codsiga iyo ugu danbayn 4:00 p.m. Maarso 25, 2026, waxaa dib looga fiirin doonaa u-qalmitaanka iyadoo loogu eegayo nidaamka lambareed oo aan kala sooca lahayn. Hal codsi oo keliya ayaa la tixgelin doonaa goob kasta oo ganacsi. Haddii codsiyada ay ka badan yihiin maalgelinta la heli karo, maamulaha deeqda ayaa qoondeyn doona lacagaha la heli karo iyadoo lagu saleynayo qaabka ay u kala horeeyaan ee loo qoondeeyay wuxuuna lacagaha ku bixin doonaa qaabkii ugu horreeyay ee la dhammaystiray (codsiga waxaa loo tixgelin doonaa mid dhammaystiran marka dhammaan dukumentiyada barnaamijka ee loo baahan yahay la helo oo la ansixiyo).

Qandaraaslaha NextStage, HCHRA bixinaya barnaamijka deeqda, ayaa ku soo wargelin doona codsadayaasha haddii/marka codsigooda la aqbalay si dib loogu eego oona looga shaqeeyo.
Upon notice of selection for review, applicants are required to submit the following within five (5) business days:

- Dukumentiyada kirida ama deynta guryaha oo qeexaya goobta codsadaha ka degan yahay Hennepin County iyo waajibaadka kirada/deyn guri ee bilaha ah.
- W-9 la dhamaystiray.
- Canshuur Celinta Ganacsiga Federaalka ee ugu dambeysay ama Jadwalka Canshuurta Ganacsiga ee ku habboon - iyadoo lagu saleynayo nooca hay'adda.
- Caddeynta khasaaraha dakhliga ka dhashay tallaabooyinkii sarkaalada sharci fulinta ay dhawaan sameeyeen ee loo yaqaano Hawlgalka Magaalada lagu soo qaaday, kuna salaysan

muddooyin la is barbar dhigi karo (tusaale ahaan Diseembar 1, 2024, ilaa iyo Febraayo 28, 2025, marka la barbar dhigo Diseembar 1, 2025, ilaa iyo Febraayo 28, 2026).

- Codsadayaashu waa inay soo gudbiyaan dukumentiyo si fiican u sharaxaya saameynta kuwaas oo ay u arkaan inay aqbali karaan maamulaha deeqda. Tusaalooyinka dukumentiyada la aqbali karo waxaa ka mid ah warbixinnada Canshuurta Iibka ee isla waqtigaas, warbixinnada laga helayo goobaha qolo saddexaad oo wax laga soo iibsaday, warbixinnada adeegga ganacsatada, iyo warbixinnada ka imanaya nidaamka iibka ama diiwaanka lacagta caddaanka ah.
- Caddeynta tirada dadkii kuu shaqaynayay laga bilaabo Diseembar 31, 2025, si loo xaqiijiyo in uu jiro ugu yaraan hal shaqaale, marka laga reebo mulkiile, iyo in ka yar 50 shaqaale oo FTE ah. Dukumentiyada la aqbali karo waxaa ku jiri kara warbixin laga helay adeegga mushahar bixinta qolo saddexaad, Foomka Federaalka 941/Canshuur celinta Federaalka ee uu sameeya loo-shaqeeya Rubuc-sanadeedka ee codsadaha, ama faylal kale oo lagu bixiyay mushahar gobol ama federaal ah.
- Wixii dukumenti ama macluumaad dheeraad ah oo NextStage u aragto in loo baahan yahay si loo hubiyo u-qalmitaanka, loo sameeyo waraaqaha deeqaha iyo warbixinnada, loo diro lacagaha, ama loo raaco xeerarka warbixinta barnaamijka.
- Ka gaabinta soo gudbinta dukumiintiyada loo baahan yahay waxay sababi kartaa in laguu diido deeqda la bixinayo.

Su'aalaha Badanaa La Isweydiiyo

Fadlan si fiican u akhri tilmaamaha barnaamijka si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan faahfaahinta barnaamijka iyo u-qalmitaanka. Su'aalaha inta badan la isweydiiyo waa la beddeli karaa adigoona wax ogeysiis ah aan lagu siinin.

Dukumentiyadayda ganacsi iyo macluumaadka aan bixiyo ma loo tixgelin doonaa xog ay arki karaa dadweynaha?

NextStage waxay ururin doontaa oo hayn doontaa dhammaan dukumeentiyada iyo macluumaadka dadka soo codsaday barnaamijka. HCHRA kuma weydiin doonto inay aragto xogta shakhsiyeed marka laga reebo waxa lagu bixiyay codsiyada iyo heshiisyada xiga ee deeqda. Si kastaba ha ahaatee, xog kasta oo la siiyo NextStage, oo ah qolo ay qandaraas la gashay HCHRA, waxay raaci doontaa Xeerka Lagu Ilaaliyo Xogta ee Dowladda Minnesota, qaar ka mid ah xogtaasna waxay noqon karaan "kuwo ay arki karaan dadka" sida ku xusan Xeerkaas.

Intaa waxaa dheer, iyadoo ay tahay go'aankeeda, HCHRA iyo/ama Hennepin County waxay baahin karaan dadka qaata deeqda (magacyada ganacsiga), cinwaanada, iyo lacagaha la siiyay,

sida iyagoo ku soo qoraya liiska magacyada ganacsiga iyo lacagaha deeqda websaydka Hennepin County, iyagoo lala wadaagaya liiska ganacsiyada, cinwaanada, iyo lacagaha deeqda ee la siiyay saraakiisha la doortay, ama habab kale oo la mid ah si kor loogu qaado hufnaanta.

Sidee ayaa loo go'aamiyaa qadarka deeqdayda?
Deeqaha la siiyo ganacsiyada u-qalma waa inay u dhigmaan laba (2) bilood oo kira ah (ama lacagta lagu bixiyo daynta guryaha) oo ku taala goobta Hennepin County ee lagu soo gudbiyay codsiga, dhan ugu badnaan $10,000. Xaalado gaar ah, HCHRA waxay xaq u leedahay inay ansixiso kharashaadka kale ee hawlgalka iyadoo ku xirnaan doonto in la baaro kharashaadka.

Marka la eego ganacsiyada u qalma ee ku qoran tilmaamaha barnaamijka, maxay ka dhigan tahay "samaynta in dadka toos wax looga gado iyo/ama in la siiyo adeegyo dadweynaha oo ay lacag ku bixinayaan"?
Ujeeddada barnaamijku waa in la caawiyo ganacsiyada inta badan si toos ah wax uga iibiya dadweynaha. Macaamiishu waxay badanaa yimaadaan goobta si ay u soo galaan ama u fadhiistaan, sida ku qoran codsiga. Ganacsiyadani waxay lumiyeen dakhli badan sababtoo ah waxay ku qasbanaadeen inay si ku meel gaar ah u xiraan ama sababtoo ah dad yar ayaa soo booqanaya intii lagu jiray ficilkii sarkaaladii sharci fulinta ay sameyeen dhawaan. Hadafku waa in la caawiyo ganacsiyadan inay sii wadaan ka shaqaynta goobtaas. Wax kala iibsiga waxaa loola jeedaa lacagta lagu bixiyo alaabta iyo adeegyada la helay xilligii adeegga la bixiyay. Ganacsiyada inta badan lacagtooda ka hela iyagoo wax ka iibiya ganacsiyada kale, inta badan waxay ka shaqeeyaan meel ka baxsan goobtooda, ama ka hela lacag qandaraasyada caadiga ah ama khidmadaha xubinnimada kuma biiri karaan barnaamijkan.

Sidee loo soo diri doonaa lacagaha haddii ganacsigaygu la doorto/la ansixiyo, sideese loo isticmaali karaa?
Lacagta barnaamijka waxaa si gaar ah loogu isticmaali doonaa lacagaha kirada/amaahda guryaha ee xarumaha ganacsiga ee codsadaha, haddii aan la oggolaan in loo isticmaalo hawl kale. Lacagaha waxaa lagu sii deyn karaa mid ka mid ah laba siyaabood:

1. In toos loogu diro qofka guriga ka kireeyay codsadaha. Codsadayaasha waxaa la siin doonaa foom ay mulkiilayaasha guryaha ay soo buuxiyaan kaasoo xaqiijinaya lacagta kirada bilaha ah, aqoonsanaya lacagta codsadaha, iyo faahfaahinta bangiga si lacagta toos loogu galiyo.

2. Sida magdhowga kirada uu codsaduhu bixiyay muddadii barnaamijka la ogaaday. Codsaduhu waa inuu keenaa dukumentiyo cadeynayo lacagtii uu horey u bixiyay si uu u helo lacagta magdhowga ah. Lacagaha hantida aad leedahay/deynta guriga waxaa laguu soo celin doonaa oo keliya markaad bixiso.

WAXAA LAGU SOO DARAY 3.19.2026: Mulkiilayaasha leh ganacsiyo meelo badan ku yaalo ma waxay u xiraynayaan codsi goob kasta?
Haa, goob ganacsi oo gaar ah, ama xarun kasta, oo buuxisa dhammaan shuruudaha u-qalmitaanka, waxay codsan kartaa oo heli karaan lacagaha deeqda. Si kastaba ha ahaatee, mulkiilaha ganacsi kasta, ama ganacsi kasta oo si gaar ah loo leeyahay wuxuu ka heli karaa lacag aan ka badnayn wadarta $24,999 Lacagaha Lagu Taageero Ganacsiyada Yaryar ee Hennepin County.

WAXAA LAGU SOO DARAY 3.19.2026: Ka waran ganacsi uu meel kale u guuro inta lagu jiro muddada u qalmitaanka – wali miyay sii ahaan doonaan kuwo u-qalma?
Ganacsi ka guuray goob ka tirsan Hennepin County una guuray goob kale oo Hennepin County gudaheeda ah inta lagu jiro mudda u-qalmitaanka wuxuu codsan karaa lacagta deeqda ah wuuna u-qalmi karaa haddii dhammaan shuruudaha kale la buuxiyo, oo ay ku jiraan awooda ay u leeyihiin inay cadeeyaan khasaare dakhliga oo dhan 30% ama wax ka badan oo ay sabab u tahay Hawlgalkii dhawaan ay dawlada federaalka ka waday gobalka.

WAXAA LAGU SOO DARAY 3.19.2026: Dukumentiyo noocee ah ayaa loo baahan yahay si loo cadeeyo in 30% ay hoos u dhacay dhakhligaaga guud marka loo fiiriyo muddo la barbardhigi karo)?
Marka ay codsatoNextStage, codsadayaashu waa inay soo gudbiyaan dukumentiyo si fiican u sharaxaya saameynta kuwaas oo ay u arkaan inay aqbali karaan maamulaha deeqda. Tusaalooyinka dukumentiyada la aqbali karo waxaa ka mid ah warbixinnada Canshuurta Iibka ee isla waqtigaas, warbixinnada laga helayo goobaha qolo saddexaad oo wax laga soo iibsaday, warbixinnada adeegga ganacsatada, iyo warbixinnada ka imanaya nidaamka iibka ama diiwaanka lacagta caddaanka ah.

WAXAA LAGU SOO DARAY 3.19.2026: Ka waran haddii ganacsi uu ka helay deeq ama amaah urur kale si ay uga caawiyaan kabida khasaaraha uu wajahayo oo ay sababtay hawlaha ay dawlada ka wado gobalka?
Ganacsi ka helay deeq ama amaah urur kale si uu u daboolo khasaaraha ka dhashay Hawlgalka ay Dawlada ka wado Gobalka wuxuu codsan karaa Lacagaha Lagu Taageero Ganacsiyada Yaryar ee Hennepin County. Si kastaba ha ahaatee, lacagaha Hennepin County looma isticmaali karo isla kharashaad ay dabooleen ilo kale oo maalgelin (si kale haddii loo

dhigo, lama oggola "in lacag laga helo laba meelood"). Ganacsigu waa inuu cadeeyaa in lacagaha laga helay urur kale loo isticmaalay in lagu bixiyo kharashaad aan ahayn kirada goobta ganacsiga ama lacagaha deynta guryaha sida ku xusan tilmaamaha Lacagaha la siinayo Ganacsiyada.

WAXAA LAGU SOO DARAY 3.19.2026: Gawaarida cuntada lagu gado ma u-qalmaan?
Maya, gawaarida lagu gado cuntada uma qalmaan deeqdan.

WAXAA LAGU SOO DARAY 3.19.2026: Wali miyaan u-qalmaa inaan codsado haddii aan xiray ganacsigayga bishi Janaayo dhaxdeeda?
Waxaan fahamsanahay in ganacsiyo badan ay dhimeen saacadaha shaqada ama xitaa si ku meel gaar ah u xirmeen intii u dhaxaysay Diseembar 2025 iyo Febraayo 2026 sababo la xiriira Hawlgalkii ay dawlada ka waday Gobalka. Xidhitaanka ku meel gaarka ah ee ganacsigu kama dhigayo ganacsi inaysan u-qalmin inay codsato. Si kastaba ha ahaatee, ganacsiyada si joogto ah u xirmay xaq uma laha deeq.

WAXAA LAGU SOO DARAY 3.19.2026: Waxaan bixiyay lacagtii kirada ganacsigayga dabayaaqadii Maarso. Ma codsan karaa deeq si la iigu soo celiyo lacagtii kirada ee aan bixiyay? Haddii ay sidaas tahay, waa maxay dukumentiyada la iga rabo inaan keeno si aan u cadeeyo inaan kiradi bixiyay?
Mulkiilayaasha ganacsi ee bixiyay kiradii Maarso 2026 oona buuxiyay dhammaan shuruudaha kale waxay codsan karaan in lacagta deeqda la siiyo mulkiilaha guriga si ay u daboosho kirada Abriil iyo Maajo 2026, ama mulkiilaha ganacsiga ayaa codsan karo in loo soo magdhabo kiradii uu bixiyay inta ugu badan haddii uu keeno rasiidhkii lagu siiyay lacagta mulkiilaha guriga ama nooc kale oo dukumenti ah oo loo arko mid ay aqbali karto NextStage.

WAXAA LAGU SOO DARAY 3.19.2026: Aniga ayaa iska leh dhismaha uu ganacsigayga ku shaqeeyo mana jirto lacag dayn ah oo la igaga leeyahay gurigayga. Wali miyaan codsan karaa deeqda?
Haa, haddii dhammaan shuruudaha u-qalmitaanka la buuxiyo. Maamulaha deeqda ayaa kula shaqeyn doona si uu u helo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ganacsigaaga iyo hantidaada, wuxuuna xisaabin doonaa kharash bille ah oo macquul ah oo qofka loogu magdhabi karo lacagaha deeqda. Lacagta deeqda lagu siinayo waxaa go'aamin doona NextStage iyo degmada/HCHRA.

WAXAA LAGU SOO DARAY 3.19.2026: Ganacsigayga waxaa la furay bartamihii 2025. Macluumaad noocee ah ayaa la isticmaali doonaa si loo ogaado in ganacsigayga uu buuxiyay shuruuda khasaaraha dakhliga ee ugu yar?

Ganacsiyada shaqaynayay in ka yar hal sano, laakiin ka badan 3 bilood kahor Diseembar 1, 2025, ayaa wali u-qalma inay codsadaan lacagta deeqda. Dakhliga bisha ka horeysa xilligii uu bilowday hawlgalka ay dawlada ka wado gobalka (Diseembar 1, 2025) ayaa loo isticmaali doonaa in lagu qiimeeyo khasaaraha dakliga marka loo eego

Warqadda Hubinta Codsiga

Qaybta 1: U-qalmitaanka Barnaamijka

Su'aasha 1.1	Ganacsigaagu ma yahay ganacsi maxalli ah oo macaash doon ah oo ku yaal Hennepin County?
Su'aasha 1.2	Immisa shaqaale ah ayuu ganacsigaaga shaqaaleeyay laga bilaabo Diseembar 31, 2025? Midani waxaa ku jirto shaqaalaha labada galin kuu shaqeeyo iyo kuwa halka galin shaqeeyo. Adeegso isku-dheelitir shaqaalaha labada galin shaqeeyo (FTE) si aad u ogaato tirada shaqaalaha. (Hal FTE waxay u dhigantaa in 2,080 saacadood shaqaaluhu shaqeeyo sannadkii)
Su'aasha 1.3	Muxuu ahaa dakhligaagu guud ee la qiyaasay sanadkii 2025?
Su'aasha 1.4	Goorma ayuu ganacsigaaga bilaabay inuu helo dakhli?
Su'aasha 1.5	Ganacsigaagu ma cadeyn karaa inuu ku soo gaaray khasaare weyn oo dakhli ah (30% ama ka badan) kana dhashay tallaabooyinka sarkaada sharci fulinta socdaalka?
Su'aasha 1.6	Immisa ayuu hoos u dhacay dakhligaaga guud sababo la xiriira hawlaha sharci fulinta socdaalka awgood?

Qaybta 2: Macluumaadka Codsaha

Su'aasha 2.1	Magaca kowaad
Su'aasha 2.2	Magaca ugu danbeeya
Su'aasha 2.3	Cinwaankaaga iimaylka
Su'aasha 2.4	Lambarka taleefonka
Su'aasha 2.5	Magaca uu ku diwaangeshan yahay ganacsiga
Su'aasha 2.6	Ma waxaad ku shaqeyneysaa magac ganacsi oo aadan lahayn mise DBA ahaan?
Su'aasha 2.6a	Muxuu yahay magaca aadan adiga lahayn ee ganacsiga ama DBA?
Su'aasha 2.7	Ciwaanka ganacsiga (sadarka 1)
Su'aasha 2.8	Ciwaanka ganacsiga (sadarka 2)
Su'aasha 2.9	Magaalada
Su'aasha 2.10	Zip Koodhka

Su'aasha 2.11 Websaydka (haddii aad leedahay)

Su'aasha 2.12 EIN/Aqoonsiga Canshuur bixiyaha ee Federaalka

Qaybta 3: Ku saabsan ganacsigaaga

Su'aasha 3.1 Si kooban u sharax waxa ganacsigaagu qabto (tusaale ahaan, adeegyo ama badeecooyin noocee ah ayaad gadaa)?

Su'aasha 3.2 Fadlan sharax sida sharci fulinta socdaalka ee dhawaan ay si toos ah u saameysay howlaha ganacsigaaga iyo dakhligaaga.

Su'aasha 3.3 Goobtaada ganacsiga ma kiraa mise adigaa iska leh?

Su'aasha 3.4 Waa immisa lacagta kirada ama deynta ee aad bixiso bish?

Su'aasha 3.5 Waa maxay qiyaasta fuudka laba jibbaaran ee goobta ganacsigaaga?

Qaybta 4: Macluumaad dadweynaha(akhtiyaari)

Su'aasha 4.1 Jinsigaagu muxuu yahay?

Su'aasha 4.2 Waa maxay isirkaada ama qowmiyada aad ka tirsan tahay (sax dhammaan inta quseyso)?